

Doorashada 2016

Dalka Soomaaliya waxaa ka dhacay doorashooyinkii aqalka sare iyo aqalka hoose ee baarlamaanka 2016. Doorashooyinkaan waxa ay ahaayeen kuwo markii la qorsheynaayey 5 sano ka hor loogu talo-galay in qof kasta oo soomaali ahi codkiisa si xor ah u dhiibto, doortana xildhibaanka uu rabo(one man one vote).



Arintaas ma aysan dhicin maadaama ay dalka soomaaliya ka jirto dhibaatooyin baahay oo dalku kala yimid dagaaladii sokeeye sida:

1* Amaan xumo baahsan taas oo dalka qaybo ka mid ah ay gacanta ugu jirto ururo xagjir ah.

2*Shacabka oo aan wali hubkii laga dhigin oo si xoog leh ay wali beeluhu hubkoodii u haystaan.

3*Qabiiladii soomaaliyeed oo aan dib u heshiisiin loo sameyn, sida dalalka uu dagaalka sokeeye ka dhacay loogu sameeyo (Reconciliation).

4*Soomalia oo waligeed ahayd dad dowlad dhexe yaqaan oo dowlad goboleedyo loo sameeyey, doorashada kuraasta gabolada dowlad gobaleedkaana ay noqotay in looga soo tartamo halkaa.

5*Dowlad gobaleedyada oo wakhtigii loogu talo-galay aan ku dhismin.

6*Bulshada caalamka oo aan ka qaadan qaybtii ay ballan qaaday sida, dhaqaale, gaadiid (logistics), supervision iyo wixii la mid ah.

7* Dadka oo aan wali u diyaarsanayn inay dantooda wax ku doortaan qabiil maah.

Arintu si kasta ha ahaatee waxa aad la isugu dayey inay dhismaan dowlad gobaleedyadii la rabay waana la dhamaystirey oo waxaa ugu dambeeyey HIIRSHABEELE oo ka kooban gobalada Hiiraan iyo Shabeelada dhexe.

Ugu dambeyn waxa ay dadka iyo dowladda soomaaliyeed goosteen inaysan doorashadu ka dibdhicin sadanka 2016ka, soomaaliduna isku tashato.

ayada oo ay taasi jirto ayey shacabka iyo siyaasiyiinta qaarkood ku eedaynayeen inay dowladdu waddo in doorashadu dib u dhacdo.

Si kastaba ha ahaatee waxaa hadana ugu dambeyntii loo dareey in la soo doorto xildhibaanadii labada aqal ee baarlamaanka, waxaana la aaday xarumaha dowlad gobaleedyada ee kala ah:

Kismanya(Jubba Land), Beydhabo(southwest), jowhar(Hiirshabeele), Cadaado(Galmudug), Garoowe(Puntland) and Mogadishu(Somaliland).

Sida caadadu ahayd sanadihii dowladaha ku meelgaarka ahaa waxaa aad u camirnaan jirey magaalada Mogadishu maadama doorashooyinku ay ka dhacayeen.

Laakiin sanadkan waxaa camirmey magaalo madaxyada dowlad gobaleedyada oo ay tageen dad cadankooda iyo dhaqaalahooda aysan midna arag.

waxaa la soo doortay 275 xildhibaan oo aqalka hoose ah iyo 54 Senitors oo aqalka sare, Senators ka waxa soo doortay xildhibaanada dowlad gobaleedka oo dhan waana qof matala shicibka dowlad gobaleedka oo dhan. Xildhibaanaka aqalka hoose waxa doortay qabiilka uu ka soo jeedo 51qof oo ka mid ah ama degmada uu ka soo jeedo ama xaafadda uu ka soo jeedo, waxa uu qofkaas matalaa degmada ama xaafadda ama qabiilka uu ka soo jeedo.

Qaabka iyo hab u socodka doorashada:

Guud ahaan waxaa can ahaa in lacag la isku iibsado oo xildhibaanaka aqalka oo hoose 51 ka qof ee ka codeynaysa ay musharixiintu lacag siiyaan ayna u codeeyaan kan ugu lacagta badan. kuraasta aqalka hoose qaar ayaa 1.5 malyuun doolarka mareykanka ah ay ku baxday.

Sida aan xog ku hayo waxaa jira 1 senator oo kali ah qof aan lacag bixin guud ahaan labada aqal ee soomaaliya 2016.

waxaa ayana jiray isticmaal awood dowladeed iyo xoolo dowladeed oo ayana aad u badan oo doorashooyinka loo isticmaalay.

Waxaa ku dhintay 2 qof inta la hubo oo sababta dhimashadoodu ay ahayd isticmaalka awood dowladeed.

Maxay Soomaalidu u aragtaa?

Shicibka soomaalidu aad iyo aad ayey uga niyad jabeen oo waxa ay yiraahdaan hal booli ihi nirig xalaal ah ma dhasho oo macneheedu yahay xildhibaanoo musuq-maasuq iyo laaluush ku yimid Madaxweyne laalush iyo musuq-maasuq ayey ku dooran doonaan.

Laakiin indheergaradka soomaaliyeed waxa ay aaminsan yihiin iney arintaani tahay arin horumar ah, marka aan fiirino caqabadaha aan kor ku soo sheegay ee jiray in ay soomaali kaligeed ay gobaladeeda aado oo ay isdoorato soona saarto xildhibaanadii baarlamaanka waa wax weyn.

Maxaa yeelay marka aad haysato meel wax lagu saxo ayaad wax sixi kartaa, sidaas darted waxa aan aaminsanahay in ay soomaaliya hore u socoto.

Abdinasir

